Qeexitaanka Edebta iyo Xeerka Si Sharciyaysan Ardayga Dugsiga Laga Ceyrinayo (PFDA)

Waa Maxay Xeerka Si Sharciyaysan Ardayga Dugsiga Laga Ceyrinayo (PFDA)?

PFDA waa magac la soo gaabiyay ee Xeerarka Minnesota (Minnesota Statutes), qodobka 21A.40 illaa 121A.56. Fadlan waxaad booqataa shabakadda internetka ee Waaxda Waxbarashada ee Minnesota (MDE) ay leedahay Pupil Fair Dismissal Act web page si aad uga samaysato nuqulka PFDA. Dugsiyada waxaa shardi ku ah inay raacaan tallaabooyinka qaarkood oo la yiraahdo"sharciga looga maro" (due process) marka ardayga dugsiga laga ceyriyo. PFDA waxay bixinaysaa qaabka hawlaha lagu socodsiinayo marka dugsiga uu ardayga ceyriyo. PFDA waxaa loogu talagalay dugsiyada guud oo idil, ay ku jiraan dugsiyada jaartarka iyo barnaamijyada dugsiyada duwan uu gobolku u fasaxay.

Waa Maxay Ceyrinta?

Ceyrinta waa marka ardayga loo diido inuu ka qaybqaado barnaamijka waxbarashadiisa, kuwaaso uu ku jiro ka joojinta, ka saarid, ama reebitaan. Ka saaridda fasalka kuma uu jiro qeexitaanka.

Waa Maxay Ka Joojinta?

Ka joojinta waa dugsiga oo lagaa ceyriyo muddo ka badan hal cisho illaa iyo toban cisho ee maalmaha dugsiga la dhigto.

Waa maxay Saaridda?

Saaridda waa tallaabo uu qaaday guddiga dugsiga ee laga saarayo ardayga dugsiga degmada ama dugsiga jaartarka muddo dhan illaa hal sanad dugsiyeed.

Waa maxay Reebitaanka?

Reebitaanka waa tallaabo uu qaaday guddiga dugsiga ee looga hortagayo inuu ardayga dib isugu qoro dugsiga degmada ama dugsiga jaartarka ama looga hortago ardayga inuu dib isugu qoro kaddib markii muddada ka saaridda ay dhammaatay illaaiyo dhammaadka sanad dugsiyeedka lagu jiro.

Maxay Yihiin Adeegyada Waxbarashada ee Loo Doortay?

Adeegyada waxbarashada ee loo doortay waxay yihiin adeegyada waxbarashada oo ay degmada siin doonto ardayga dugsiga laga soo ceyriyay muddo ka badan shan cisho ee isku xiga, ama laga saaray ama laga reebay dugsiga. Adeegyadaan waxaa lagu siinayaa goob duwan ee aan ahayn goobta dugsiga iyo ay ku jiri karto daraasado guriga ee korka lagala socdo,adeegyada ku wajahan guriga, iwm. Haddii uu ardayga ka faaiidaysto adeegyada loo soo bandhigay, adeegyada waa inay ahaadaan kuwo ku habboon si uu ardayga ku gaaro horumar

lagu qancinayo heerarka qalinjabinta degmada iyo gobolka iyo ardayga ku caawinaya u diyaargarowga dib ugu noqoshada.

Waxyeellada laga Dhaxlayo Ceyrinta Dugsiga

Haddii ardyagaaga laga ceyriyo dugsiga, ardaygaaga looma oggola in uu tago ama iska xaadiriyo dhismayaasha kasta ama dugsiga, dhulka, basaska dugsiga, xafladaha dugsiga, hawlaha, safarrada marka laga reebo ujeeddooyinka ah in uu ka qaybqaato barnaamijka waaxbarashada la doortay taaso qayb ka ah tallaabooyinka ardayga aqlaaqdiisa.

Haddii aad wax su'aalo ka qabto waxa ku saabsan aqlaaqda ardayga, ay ku jiraan su'aalaha waxbarashada qaaska, la soo xariir MDE Waxdeeda Adeecidda iyo Caawinada (MDE's Division of Compliance and Assistance) ee laga wacayo 651-582-8689.

Diidmo: *Had iyo jeer sharciga waa baddalmaa, arrin kastana ay si gaar u duwantahay. Dukumiintigaan waxaa loogu talagay inay fikrad guud ku siiso kumana siinayso talo qaas ee sharciga la xariira. Fadlan macluumaadka qoraalkaan ku yaalla si taxaddar leh u isticmaal sababtoo macluumaadkaan si saxa ugama turjumayo isbaddallo ka dambeeyay markii la qorayay ama la turjumay qoraalkaan.*